

NE 130th St & NE 125th St Mobility and Safety Project (Mashruuca Socodka iyo Nabadgelyada)

2024



Socodka, baaskiilka, iyo hagaajinta gaadiidka ee xaafadaada imaanaya!

Waxaan horumarin ku samaynaynaa NE 130th St, Roosevelt Way NE, iyo NE 125th St laga bilaabo 1st Ave NE ilaa bari ee Lake City Way NE! Isbeddelladani waxay u fududayn doonaan dadka socodka, baaskiilka, rogrogmada, iyo raacitaanka baska. Waxay sidoo kale kaa caawin doonaan inaad tagto saldhigga cusub ee tareenada fudud ee NE 130th St ee u dhow I-5. Ku dhawaad 4,000 oo Rakaab maalinle ah ayaa la filayaa, iyadoo 90% Rakaabku ay lug, baaskiil, ama gaadiid dadweyne ku imaanayaan halkaas.

Horumarinta soo socota waxay qayb ka tahay mashruuca:

- Jidadka baaskiilka ee la ilaaliyo oo leh xayndaab shub ah si baaskiilka looga dhigo mid badbaado leh
- Horumarinta adeegga baska oo leh joogsiiyo cusub oo la cusboonaysiiyay, wadooyin baska keliya ah, iyo casriyaynta Layrarka si basaska loo bilaabo
- Nakhshad waddo iyo isgoysyo ammaan ah si ay uga caawiyaan ka hortagga shilalka halista ah iyo kuwa dhimashada leh
- Isgoysyada nabdoon oo leh calaamado cusub oo loogu talagalay dadka socda, baaskiil wata, iyo rogrogmada, iyo hagaajinta seenyaalaha taasoo u ogolaanaysa dadka socda ama rogrogaya inay ka hor maraan baabuurta iyo baabuurta waaweyn
- Dayactirka dariiqyada lugta iyo dalcadaha cusub ee laga geli karo meelaha la doortay

Iskaangaree koodhka QR si'aad u booqato bog-khadkeena. Waxaad wax ka baran kartaa mashruuca oo waxaad isku diiwaan kartaa wargelimada mashruuca.



Waxaad kaga lug yeelan kartaa siyaabahan:

- Ku biir isku imaadka soo-bandhiga xaafadda
- Ku biir shir Bulsho
- La kulan kooxdayada inta lagu jiro booqasho xaafadeed

Xiriirka Mashruuca:

Drue Nyenhuis

NE130thSt_NE125thSt_Project@seattle.gov

(206) 400-7515 www.seattle.gov/transportation/

NE130thMobilityProject



Seattle
Department of
Transportation



King County
METRO

Jadwalka Mashruuca

Qorshaynta		Nakhshad		Dhismaha		
Qorshaha Weyn	Horumarinta Mashruuca	Naqshada Hore	Naqshad ugu dambaysa	Dhismihii ka hor	Inta lagu jiro	Isku soo duub

Waxaan joognaa halkan

- **Qorshaynta (2023):** Waxaan naqshadeynay horumarinta amniga iyo marin u helka anagoo kaashanayna talada bulshada.
 - **Nakhshad (2023-2025):** Abuur oo la wadaag soo jeedinta naqshadaynta ee ra'yi-celinta bulshada.
 - **Dhismaha (2025-2026*):** Waxaan wadaagi doonaa jadwalka dhismaha, hawlaha, iyo saamaynta.
 - **Adeegga tareenka fudud wuxuu bilaabmayaa (2026):** Booqo websaydka Sound Transit si aad u hesho macluumaadka hadda ee Saldhigga Soo gelista ee NE 130th St.
- *Jadwalka dhisidda wuxuu isku-beddeli karaa helitaanka ku salaysan shaqaalaha iyo helitaanka alaabta.

Mashruucani wuxuu saameyn yar ku yeelan doonaa Northacres Park oo ku taal inta u dhaxaysa NE 130th St iyo Interstate 5. Dib-u-qaabayn yar oo ka socota geeska 1st Ave NE iyo NE 130th, goobta u dhaw meesha laga fuulo Interstate 5 waxay u baahan doontaa isbeddello joogto ah gudaha Dhulka Seattle Parks & Recreation:

- Ku rakibida dalcad cusub ee u hoggaansanaata ADA ee geeska 1st Ave NE iyo NE 130th St kaas oo isticmaali doona ku dhawaad 72 feet oo laba jibaaran ee Dhulka Northacres Park.
- Dib u dhiska laamiga hareereya NE 130th St ee u dhaw Interstate 5 meesha laga fuulo si loo bixiyo meel socod oo balaaran loona sameeyo Cabir ku filan wadooyinka gaadiidka bari u socda.

Isbeddellada yaryar ee Northacres Park ayaa la go'aamiyay inay noqdaan *de minimis* (*mid aad u yar*) Sida hoos timaada Qeybta 4(f) ee Waaxda Gaadiidka Mareykanka (USDOT) ee 1966.

Saamaynta *de minimis* (*aadka u yar*) waa mid aan si xun u saamaynaynin sifooyinka, ama hawlaha u qalma ilaalinta Hantida ee hoos timaada Qaybta 4(f). U hoggaansanaanta Qaybta 4(f) ayaa looga baahan yahay mashaariicda hela maalgelinta federaalka.

Xiriirka Mashruuca:

Drue Nyenhuis
NE130thSt_NE125thSt_Project@seattle.gov
(206) 400-7515 www.seattle.gov/transportation/NE130thMobilityProject